

# DARYEELKA CAAFIMAADKU WAXA UU NOQDAY MID AAD LOO AWOODI KARO

## Caawimada Cusub ee Maaliyada waa la Heli karaa!

Maalgelinta cusub ee federaalka waxay ka dhigtaa daboolida xataa wax ka badan inta la awoodo. Haddii aad hadda ka hor ka diiwaan gashan tahay caawimada maaliyada waxaad heli kartaa wax badan. Haddii aanad diiwaan gashanayn, waxaad u qalmi kartaa caawimada maaliyada wixii ah wakhtiga koowaad... xataa haddii aanad hadda ka hor u qalmin.

**La xidhiidh Caafimaadka Gobolka NY:**

Onlayn: nystateofhealth.ny.gov

Xarunta Adeega Macmiilka:
1-855-355-5777 (TTY:1-800-662-1220)

Kaaliyaha Diiwaangelinta:
info.nystateofhealth.ny.gov/findassistor

*Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan American Rescue Plan (Qorshaha Badbaadada Maraykanka):*
https://info.nystateofhealth.ny.gov/AmericanRescuePlan

nystateofhealth™
The Official Health Plan Marketplace

# THE ESSENTIAL PLAN

CUSUB SANADKA 2021: $0 OO LACAGTA CAYMISKA IYO DHAMMAAN QORSHAYAASHA WAXAA KU JIRA DARYEELKA INDHAHA IYO ILKAHA.

**Essential Plan (Qorshaha lama Huraanka ) way ku habboon tahay dad badan oo leh dakhliyo hooseeya.**

**Lacagta bishii la qaado ayaa ah $0 dadka u qalma caymiska.**

**OO MA JIRTO JARJARID, markaas qorshahu waxa uu u bilaabaa bixinta daryeelkaaga caafimaadka si toos ah.**

## THE ESSENTIAL PLAN (QORSHAHA LAMA HURAANKA AH) WAXAY BIXISAA DHEEFO ISKU MID SIDA QORSHAASHA KALE EE CAAFIMAAD:

- Booqashooyinka dhakhtarka, ay ka mid tahay dhakhaatiirta takhasuska leh
- Baadhitaanada dhakhtarkaaga
- Daawooyinka dhaqtarka qoray
- Bukaan jiifka iyo daryeelka bukaan socodka ee cusbitaalka
- Adeegyada Ilkaha iyo Aragtida

**Hoosta Essential Plan (Qorshaha lama Huraanka), qaybta aad bixisaa adeeg kasta oo caafimaad – kharashkaaga la wada bixiyo – aad ayuu u hooseeyaa, wakhtiyada qaarkeed 0$.**

**Iyo adeegyada ka hortagga waa bilaasha, ay ku jirto baadhitaanada caadiga ah ee dhakhtarka iyo baadhista.**

Ku soo biir Essential Plan (Qorshaha Lama huraanka ah) maanta. Diwaangelintu way furantahay **SANADKOO DHAN.**

NY State of Health waxay u hoggaansanta sharciyada xuquuqaha madaniga Federaaliga ee lagu dabiqi karo iyo sharciyada gobolka, oo wax kuma takoorto qaababka isirka, midabka, asalka qaranka, caqiidada/diinta, sinjiga, da'da, heerka guurka/qoyska, naafada, diiwaanka xabsiga lagu qaatay, dembi kuhelida falka dambi, aqoonsiga sinjiga, qaabka galmada, sifooyinka u nuglaanshaha hidda sidaha, heerka guurka, gabood falka guriga heerka dhibanaha iyo/ama aargoosiga.